

Adeegyadaayada

- **Waaxda Qalabyada Khatarta ah (HMD)**, waxay ogolaataa oo ay kormeerida u hoggaansanaanta ku qabataa xarumaha ay dabaqan mid ama in ka badan oo ka mid ah barnaamijyada midaysan
- **Qeybta Baaritaanka Qorshaha Haamaha Kaydka Dhulka Hoostiisa ah (UST)** waxay dib u eegis ku samaysaa oo ay ogolaataa dhismada, casriyenta, wax ka beddelka, iyo/ama meesha ka saarida UST
- **Qeybta Baaritaanka Qorshaha Ganacsiga Qalabyada Khatarta ah (HMBP)**, waxay ganacsiyada cusub iyo ganacsiyada maraya horumarinta kiraystaha ka caawisaa inay u hoggaansamaan HMBP-kooda
- **Qeybta Waajibaadka Walxaha Khatarta ah**, waxay ka jawaabaa su'aalaha farsamada ee la xiriira walxaha khatarta ah iyo qashinka khatarta ah
- **Qeybta Caawimaadda ee Nidaamka Ka Warbixinta Deegaanka ee California (CERS)**, waxay tas-hiilaadka ka caawisaa dhamaystirka iyo soo gudbinta macluumaadka ganacsigooda iyada oo loo marayo CERS
- **Kooxda Ka Jawaab-celinta Dhacdada Khatarta ah (HIRT)**, waxay baaraan oo ay wax ka qabtaan xaaladaha degdega ah ee la xiriira kiimikaadka waxayna wax ka qabtaan cabashooyinka la soo gudbiyo wakhtiyada ka baxsan saacadaha shaqada ee caadiga ah kuwaas oo loo soo gudbiyo Waaxda Caafimaadka iyo Tayada Deegaanka (DEHQ). HIRT waxay si wadajir ah jawaab bixin ula samaysaa Waaxda Dabka ee San Diego
- **Wacyigelinta Bulshada**, HMD waxay wacyigelin ku qabataa dugsiyada deegaanka, carwooyinka, iyo dhacdooyinka kale ee bulshada
- **Wadashaqeynta**, HMD waxay la shaqaysaa hay'adaha kale, kooxaha warshadaha, iyo kooxaha bulshada iyo ururada

Caawinaad raadso. Hel jawaabo.

Ka caawinta ganacsiyada inay fahmaan sida loo helo oggolaanshaha HMD iyo sida loogu hoggaansamo waxay kor u qaadaysaa ilaalinta deegaanka iyadoo aan dhammaanteen si wadajir ah uga faa'iidayno Deegaan nadiifsan oo ammaan ah ee San Diego.

Su'aalaha Ogolaanshaha / Qaansheegadka:
(858) 505-6661

HMDops@sdcounty.ca.gov

Caawimaadda CERS:
(858) 505-6990

HMDops@sdcounty.ca.gov

Websaydka Cabashooyinka / Warbixinada

Aan La Ogotayn:

(858) 505-6657

HMDcomplaint@sdcounty.ca.gov

Su'aalaha kale ee Hazmat:

(858) 505-6880

HMDutyEH@sdcounty.ca.gov


DEGMADA SAN DIEGO

WAAXDA CAAFIMADKA
IYO TAYADA
DEEGAANKA (DEHQ)

WAAXDA WALXAHA
KHATARTA AH
(HMD)

Oggolaanshooyinka





Yaa ogolaansho uga baahan HMD?

Ogolaanshaha Xarunta Barnaamijka Midaysan (UPFP) ayaa looga baahan yahay goob kasta oo ganacsigu hoos yimaado mid ama in ka badan oo ka mid ah qaybaha barnaamijka midaysan.

HMBP: Qorsaha Ganacsiga Walxaha Khatarta ah

HW: Qashinka Khatarta ah iyo Daawaynta HW

UST: Haamaha Kaydka Dhulka Hoostiisa ah
APSA: Xeerka Kaydinta Shidaalka ee Dhulka Korkeesa ah

CalARP: Barnaamijka Siideynta Shilalka ee California

Barnaamijyada lagu dabaqayo waxay ku xiran tahay...

- Maxay yihiin waxyaabaha khatarta ah?
- Waa maxay caddadka la keydinayo/maareynayo?
- Waa maxay caddadka bilowga ee saxda ah?
- Ma wasakh/qashin baa? Hadday haa tahay, sidee loo maareeyaa?
- Haamahana, miyey ka sarreeyaan mise ka hooseeyaan dhulka?

Waa maxay HMD?

Waxda Caafimaadka iyo Tayada Deegaanka (DEHQ) - Qaybta Walxaha Khatarta ah (HMD) waa **Hay'adda Barnaamijyada Midaysan ee Shahaadaysan (CUPA)** ee loogu talagalay Degmada San Diego. CUPA waa hay'ad maxali ah oo awood sharci u leh barnaamijka midaysan. HMD iyo CUPA ayaa inta badan loo isticmaalay si isku bedel ah.

Hadafka Waxda Walxaha Khatarta ah waa in la ilaaliyo caafimaadka bini'aadamka iyo deegaanka iyadoo la xaqiijinayo in walxaha khatarta ah, wasakhda halista ah, wasakhda daawooyinka, iyo haamaha kaydinta dhulka hoostiisa ku jira si sax ah loo maareeyo iyadoo la isticmaalayo waxbarid, wacyigelin, iyo xoojin.

Sidee loo Codsadaa Ruqsadda/Oggolaanshaha?

Si aad tillaabada kowaad ugu dhigto mid fudud hadba sida ugu macquulsan, codso rukhsadoggolaansho haddii xaruntaadu samayso mid ka mid ah waxyaabahan soo socda:

- ✓ Samayso ama daweyso qashinka khatarta ah ama wasakhda daawada caddadkay doonto ha noqotee
- ✓ Kaydiso ama la macaamisha walxaha khatarta ah ama kiimikooyinka meel heerkeedu yahay ama ka sarreeya HMBP (55 gallon oo dareere ah, 500 rodol oo walxaha adag ah, 200 afar jibaaran oo fiit oo gaas ah)

Tusaalooyinka caamka ah ee Walxaha Khatarta ah:

Saliid, Nafto, Shidaalka, Rinji, Daawada Barafka, Bacriminta, Gaasaska la cadaadiyo, Waxyaabaha Biyaha Ku Milma



Booqo websaydkeena oo buuxi [codsiga ogolaanshaheena](https://www.sandiegocounty.gov/deh/hazmat)

laga helo

<https://www.sandiegocounty.gov/deh/hazmat>

ama naga soo wac
(858) 505-6880

